



Ma ku timid Finland sannadkii 2015-kii magangelyoddoon ahaan, oo ma lagu siiyay sharciga badbaadada caalamiga ah? Waxaa dhici karta in aad xaq u leedahay sharciga degganaanshaha ee joogtada ah

Dayrta sannadka 2019, dad badan oo ka mid ah kuwii magangelyoddoonnimada ku yimid Finland sannadkii 2015-kii, waxaa ay codsan karaan sharciga degganaanshaha (ciqaamadda) ee joogtada ah, sababtoo ah sharciga degganaanshaha joogtada ah waxaad codsan kartaa, kaddib markii aad Finland ku nooleyd afar sano oo xiriir ah, adigoo haystay sharciga degganaanshaha dalka ee la cusboonaysiiyay.

Sharciga degganaanshaha dalka ee joogtada ah waa mid shaqaynaaya illaa iyo waqti dambe oo aan la cayimin, taasoo loola jeedo in uu yahay sharci aan mudada uu shaqeynayo la xadidin.

Yaa qaadan kara sharciga degganaanshaha dalka ee joogtada ah?

Waxaad qaadan kartaa sharciga degganaanshaha joogtada ah, markii

- aad Finland ku nooleyd [afar sano oo xiriir ah](#), adigoo haystay sharciga degganaanshaha la cusboonaysiiyay (Sharciga degganaanshaha A) iyo in
- [shuruudihii lagu bixinaayay](#) sharciga degganaanshaha la cusboonaysiiyo ay wali jiraan.

Dadka la siiyay sharciga badbaadada caalamiga ah, marka la tirinaayo xilliga ku noolaanshaha dalka ee sida xiriirka ah, waxaa laga soo bilaabayaa maalinkii uu qofku waddanka soo galay.

Haddii lagu siiyay sharciga degganaanshaha oo ku saleysan badbaada caalamiga ah, yacni magangalo ama badbaadada heerka labaad, shuruudaha lagu bixiyo sharciga degganaanshaha la cusboonaysiiyo waa kuwa inta badan weli shaqeynaya.

[Haddii aad samaysay dambiyo ama aad dambi ku eedeysan tahay](#), waxaa dhici karta in sharciga degganaanshaha joogtada ah aan lagu siinin.

Goorma ayay tahay in aad codsato sharciga degganaanshaha joogtada ah?

Waa in aad codsataa sharciga degganaanshaha dalka ee joogtada ah, kahor inta aan sharcigaaga degganaanshaha ee hore uusan kaa dhicin. Si kastaba ma ahan in aad sharciga degganaanshaha codsato iyadoo waqti badan ka dhiman yahay dhicitaanka kii hore, waxaana aad codsan kartaa markii ay dhicitaanka sharcigaaga degganaanshaha ka harsan tahay muddo dhan qiyaastii saddex billood. Haddii aad sharciga degganaanshaha codsato waqtigaas kahor, Waaxda socdaalku ma samayn karto baaritaanka arrinka sharcigaaga degganaanshaha ku saabsan ee ah, inaad soo buuxisay shuruudihii helitaanka sharciga degganaanshaha iyo inkale.

Sidee ayaa sharciga degganaanshaha joogtada ah loo codsadaa?

1. Codsiga waxaad ka buuxisaa adeegga internetka ee Enter Finland. Haddii aadan isticmaali karin adeegga internetka, waxaad ku codsataa foomka waraaqda ah ee la buuxinaayo.
2. Waxaad ballan ka qabsataa adeegga [waqti ballansashada](#) ee xafiiska adeegga Waaxda Socdaalka (imaagareeshinka).
3. Waa inaad hore u soo bixisaa kharashka ku baxaaya falanqaynta, adigoo ka bixin kara adeegga Enter Finland gudihisa, ama ugu dambayn aad bixiso marka aad xafiiska arrinkaaga ka dhammaysanayso .
4. Isla ballankaas aad xafiiska ku tagtay waxaad dalban kartaa [baasaboorka ajnabiga ama baasaboorka qaxootiga](#). Mana jiraan wax foomam gaar ah oo lagu codsado baasaboorradaas, kaliya waxaa kugu filan in aad hore u sii qaadato sawir aad gashay wax ka yar lix bilood ka hor iyo kharashka ku baxaaya falanqaynta arrinka baasaboorka.

Waxaad faahfaahin dheeraad ah oo arrinkaan ku saabsan ka akhrisataa sharciga degganaanshaha joogtada ah iyo shuruudaha lagu codsan karo, bogga internetka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi/pysyva-oleskelulupa.

Yaa heli kara dhalashada Finland?

Helitaanka dhalashada Finland waxaa sharddi u ah, in aqoonsigaaga shakhsiyadeed si cad oo [la aamini karo](#) loo caddeeyay. Waxaa arrinkaas loola jeedaa, in tusaale ahaan aad leedahay baasaboorka ama dukuminti kale oo ah aqoonsi shakhsiyadeed sharci ah.

Waxaa kaloo lagaa doonayaa in aad soo bandhigi karto, in aqoontaada luqadeed ee finnishka ama iswidishka ay tahay [heerkii laga doonaayay](#) iyo in aad Finland shantii sano ee ugu dambaysay ugu nooleyd si joogto ah oo aan kala go' lahayn. Haddii aad Finland ku timid qaxooti ahaan, ama sharciga degganaanshaha dalka ee lagu siiyay uu yahay mid lagu saleeyay badbaadada caalamiga ah, waxaad dalban kartaa dhalashada dalka, marka aad Finland si joogto ah ugu nooleyd muddo [afar sano ah oo aan kala go' lahayn](#).

Helitaanka dhalashada waxaa sidoo kale ku xiran shuruudo kale, kuwaasoo aad ka akhrisan karto [halkaan](#) Marka aad xaraysanayso codsigaaga dhalashada, waa in aad ka taxaddartaa in aad haysato sharciga degganaanshaha dalka oo shaqaynaaya (aan dhicin). Sharciga degganaanshaha dalka waa in uu ahaadaa mid shaqaynaaya, mudada ay socoto falanqaynta codsigaaga dhalashada oo dhan.